Macluumaadka Ugu Danbeeyay ee COVID-19 ee Early Achievers

Hakinta Kumeel Gaadhka ah ee Shuruudaha Wakhtiga

Wareegta Badhasaab Inslee 20-31, taas oo lagu yara hakiyay shuruudaha wakhtiga Early Achievers waxa ay bilaabmaysaa Maarso 26, 2020, waxaana la filanayaa inuu dhaco Sebteember 1, 2020. Bayaanka:

- Ka tanaasulka kumeel gaadhka ah iyo joojinta xaalada gaarka ah ee la xidhiidha Early Achievers si loo yareeyo caqabadaha barnaamijka waxbarahsada hore.
- Ka qaadida shuruudaha wakhtiga Early Achievers ee isduwaan gelinta, Heerka 2 iyo qiimaynta ilaa Sebteember 1, 2020.

Waxa La Filan Karo Marka Wakhtiga Dib Loo Bilaabo

- Barnaamijyada waxbarashada hore ee uu la dhaafay ee Barnaamijka Kaalmada iyo Waxbarashada Caruurnimada Hore (The Early Childhood Education and Assistance Program, ECEAP) ama shuruudaha wakhtiga kaabista inta ku dhawaaqoodu uu ahaa30 maalmood oo ka bilaaba dhamaanka ku dhawaaqida si loo buuxiyo shuruudaha wakhtiga.
- Barnaamijyada waxbarashada hore waa inay ku biiraan Early Achievers si ay u buuxiyaan halbeega is duwaan gelinta.
- Barnaamijyada waxbarashada hore waa inay soo gudbiyaan Arjigooda Heerka 2 si ay u buuxiyaan halbeega Heerka 2.
- Barnaamijyada waxbarashada hore waa inay soo gudbiyaan**Dalabka Early Achievers ee Qiimaynta Goobta (Early Achievers Request for On-Site Evaluation, EAROSE)**si ay u buuxiyaan qiimaynta halbeega.
- Uruurinta macluumaadku waxaa lasii wadi doonaa in la hakiyo ilaa dhamaadka 2020. EAROSE lasoo gudbiyay waxa uu weli u baahanayaa shuruudaha wakhtiga kaabista iyo qiimaynta wakhtigan, xataa hadii ayna jirin wax macluumaad ah oo wakhti xaadirkan socdaayi.

Dib u Mala Awaalka Early Achievers

Marka la eego sida Early Achievers ay u taageeri karto barnaamijyada waxbarashada si ay u bixiso daryeel tayo leh oo caruurta iyo qoysaska ay u shaqaynayso ah, waxa aanu kala shaqaynaynaa ka qayb galayaasha iyo cida aanu la shaqayno si ay u eegaan Early Achievers iyo in la sameeyo tobobare, uruurin macluumaad iyo nidaamka qiimaynta si:

- Qaab shakhsi ahaaneed oo dheeraad ah oo lagu xoojinyo oo laguna baranayo barnaamijka waxbarashada hore ee dadaalka hormarinta tayada.

Washington State Department of CHILDREN, YOUTH & FAMILIES

- In la sameeyo kaalin firfircoon oo lagaga jawaabayo arrimaha tayada iyo midab takoorka qaabaysan ee nidaamka waxbarashada hore.
- Qiimaynta iyo dhax gelin macluumaadka ka qayb galayaasha.

Waxa naga go'an in aanu idiinka warano barnaamijyada waxbarashada hore nidaamka oo waxa aanu ku dadaali doonaa in aanu ku siino wargelin hore, tilmaamo cad, iyo in aanu ka shaqayno si aanu kuu siino qaab dabacsan kahor inta aan la bilaabin uruurinta macluumaadka wakhti kamid ah 2021.

Su'aalaha Badanaa La Iswaydiiyo

S: Waxa aan xidhnaa dhawr bilood oo dadka ku jiraana way yar yihiin. Waxaa soo dhaw qiimaynteeda halbeega. Miyay tahay inaan soo gudbiyo Dalabka Early Achievers ee Qiimaynta Goobta (EAROSE)?

J: Haa! Gudbinta EAROSE kahor qiimayntaada hore ee halbeega waxa uu kuu saamaxaysaa inaad sii wado qaadashadaada kaabista oo waxa uu u saamaxayaa barnaamijyada waxbarashada hore ee aan dhaafin 30-bilood wakhtiga ah inay sii wataan gudbitaanka kaabista qaybta 2%.

Barnaamijyada waxbarashada hore ku dhawaaday wakhtigii uu kaga eegaa qiimayntooda, ee soo gudbiyay EAROSE waxay ka hortagi doonaan inuu dhaco qiimayntooda oo waxa uu u sahlayaa in barnaamijyada waxbarashada hore ee kaabista la qiimeeyo si ay usii wataa helitaanka guditaanka qaybta iyo Abaal Marinta Hormarinta Tayada.

S: Waxaa i dhaafay qiimayntayda halbeega oo waxa aan doonayaa inaan qaato kaabis mar kale, laakiin waa la i qiimayn waayay maadaama oo uruurinta macluumaadka hakad la geliyay. Ma jirtaa si aan ugu qalmi karo ogolaanshaha kaabista wakhtigan?

J: Waxa aanu doonaynaa in dhamaan barnaamijyada waxbarashada hore aad doonayso heli karaan dariiqa ay ugu qalmayaan kaabista oo dhamaan qoysasku helaan daryeel tayo leh iyada oo aan la eegeynin hakinta uruurinta macluumaadka iyo qiimaynta wakhtigan. Laga bilaabo Julaay 22, 2020, barnaamijyada waxbarashada hore ee u qalma inay qaataan kaabista maadaama oo ka dhaaftay qiimayntoodii halbeega waxay soo ceshan karaan u qalankooda kaabista iyada oo soo gudbiya Dalabka **Early Achievers ee Qiimaynta Goobta (EAROSE)** oo waxay ku jirayaan kuyuuga uruurinta macluumaadka.

EAROSE la gudbiyo wixii ka danbeeya halbeega qiimaynta waxa uu u sahlayaa barnaamijyada soo hoos galaya qaybtan in loo ogolaado kaabista mar kale, laakiin ma suurto gelinayso dib u bilawga qaybta ama Abaal Marinta Hormarinta Tayada ilaa inta barnaamijyada waxbarashada hore uu heleyo qiimaynta u qalanka.

S: Waxa aan soo gudbiyay EAROSE oo waxa aan ku jiraa kuyuuga qiimaynta. Maxay tahay inaan sameeyo si aan ugu diyaar garoobo qiimaynta?

J: DCYF iyo Early Achievers waxay aqoonsadaan barnaamijyada waxbarashada hore iyo qoysaska ay u shaqeeyaan ee ay lasoo daristay caqabada aan hore loogu diyaar garoobin inta lagu jiray wakhtigan adag. Marka danbe, Early Achievers waxa ay si gaar ah u eegi doontaa waxyaabaha ay ku jiraan heerarka iyo agabka iyo qaabka aanu adeegsano si aanu u qiimayno tayada. Waxa aanu ku talinaynaa in dhamaan shaqaalaha barnaamijka waxbarashada hore ay isticmaalaan daryeelka nafta oo ay dhaqan geliyaan

jahwareerka laga warqabo, nidaamyo bogsasho oo ku xeeran taageerada caruurta iyo qoysaska. Waxa aanu kugu dhiiri gelinaynaa inaad sii wado ka shaqaynta tobobaraha Early Achievers ee diirada lagu saarayo dhaqan gelinta nidaamka munaasabka ah, isdhaxgalka macalinta-ilmaha iyo ka shaqaynta deegaanada waxbarashada.

S: Waxa aan ka shaqaynayay Heerka 4 ee qiimaynta laakiin waxaan aan walaac ka qabnaa in aan buuxin doono qaar kamid ah heerarka shuruudaha xidhitaanka/dadka yar ee ku jira darteed wakhtigan bandooda gobolka.

Waxa aan fahansanahay in nidaamka, duwaanka barnaamijka iyo faylka caruurta uu saamayn karo safmarku. Marka danbe, Early Achievers waxa ay si gaar ah u eegi doontaa waxyaabaha ay ku jiraan heerarka iyo agabka iyo qaabka aanu adeegsano si aanu u qiimayno tayada. Waxa aanu kala shaqayn doonaa cida aanu wada shaqayno iyo ka qayb galayaasha inay naga caawiyaan qaabaynta is badalada Early Achievers. Inta aanu kala shaqaynayno ka qayb galayaasha iyo cida aanu gacansaarka leenahay samaynta nidaamkan, waxa aanu macluumaad ka uruurin doonaa bixiyahaasha si loo abuuro qorshe la dhaqan geliyo oo u sahlaya ka qayb galayaasha inay helaan wakhti ay ugu diyaar garoobaan isbadalka nidaamka uruurinta macluumaadka iyo in la qiro isbadalka marka hore iyo nidaamka goobo badan ay leeyihiin inta lagu jiro safmarka COVID-19.